

Macluumaadka ku saabsan ka warbixinta xadgudubka caruurta ee adeegyada bulshada loo soo gudbinaayo

Dadkayaga ka shaqeeya caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka waxa na saaran waajib ah in aan soo sheegno xadgudub ilmaha

Haddii aan anaga ka shaqeyna qaybta daryeelka caafimaadka aanu ka shakino in ilme lagu xadgudbay ama halis uu ugu jiro in lagu xadgudbo, waxaa nalooga baahan yahay sida sharciga ah inaanu tan soo wargalino adeega bulshada.

Adeegyada Bulshada waxa uu hubinayaan inaad adiga waalid/daryeelaha iyo ilmahu aad heshaan taageerada iyo caawimaadda aad u baahan tihiin. Shaqaalaha caafimaadku waa inay soo wargeliyaan adeegyada bulshada in qoyskaaga uu u baahan karro caawimo iyo taageero, iyadoo aan mar walbana u hawlgalno waxa danaha ilmaha ugu fiican ay yihiin.

Maxaa dhaca mara la soo gudbiyo xad gudbo ilmaha?

Adeegyada bulshadu waxay samayn doonaan baadhitaan 24 saacadood gudahood ah si ay ugu eegan haddii ilmuhu u baahan yahay ilaalo degdeg ah. Haddii la tuhunsan yahay in ilmaha loo geystey ama wali loo geyto dilmo qoyska dhexdiisa ah, waxa la bilaabi doonaa baadhitaan deg deg ah.

Adeega Bulshada waxa uu marka hore sameeyaa qiimeyn guud halkaas oo ay la hadlaan qoyska. Dabadeed baadhitaan ayaa la bilaabi doonaa, laakiin kaliya haddii uu jiro shaki ah in ilmaha lagu xadgudbey ama haddii qoysku u baahan yahay taageero. Waa adeega bulshada cid go'aamineysa in baadhitaan la sameeyo in kale.

Maxaa dhacaaya haddii baadhitaan la sameeyo?

Haddii baadhitaan la sameyn doono, waxay adeegga bulshadu badanaa la soo xidhiidhi doonaan dhinacyada kale, tusaale ahaan xarunta caafimaadka ilmaha, xadaanada iyo dugsiga si loo helo sawir buuxa oo ku saabsan xaaladaha ilmaha iyo qoyska. Adeega caafimaadka ayaa sidoo kale lala xidhiidhi doonaa. Si kasta ha ahaatee, waxaanu u baahan nahay inaan keeno macluumaad iyadoo aan sir hayntu khuseyn halkan.

Baadhitaanka waa in la soo dhameeyo mudo afar bilood gudahood. Ilaa taasi dhacayso, adeegga bulshada ayaa go'aamin doona nooca caawimada iyo taageerada ilmaha iyo qoysku u baahan karaan ama haddii ilmuhu u baahan yahay ilaalin.

Haddii aad tahay waalid/daryeele sii ogolaashahaaga, adeegga daryeelka caafimaad ayaa la ogeysiin karaa natiijooyinka baadhitaanka.